

Xeer hoosaadka (qiimeynta aasaasiga) ee Iskoolada Vivalla iyo Lundby

Iskooladeena , xannaanada iyo fasalada 1-16 jirka, waxay si firfircooni le huga shaqeynaayaan in ay caruurta/ardayda kor u qaadaan fahamkooda ah **qiimaha ay Dimuqraadiyada** ku dhex leedahay bulshada dhexdeeda iyo in loo daayo inay fikirkooda kadhiibtaan waxyaabaha dunida ka dhacaaya. Taas waxay ku qorantahay manhajka dugsiyada Lpo 94 iyo manhajka xannaanooyinka Lpfö 98, waxaana soo go'aamiyay baarlamaanka Iswidhan..

Dugsiyada ku yaala agagaarkeena waa inay ahaadaan kuwo furan lehna **jawi wanaagsan**, kaasoo ilmaha/ardayda siinaayaa fursad ay kuhorumariyaan maskaxdooda laguna daryeelo .

Waxaan aasaaseynaa oo adkeyneynaa in arday walba lagu **qadariyo mowqifkiisa**, halkaasoo qof walba la siinaayo qiimeyntiisa, isla markaana laga shaqeeyo sinaanta ragga iyo haweenka. Xannaanada iyo dugsiyada waa inay ahaadaan meel qofku uu ku helaayo **badbaado** kana madax bannaan is maagid iyo takoorid.

- Waxaan rabnaa inaan ilmaha/ardayda tusno **mowqif dimuqraadiyad ku saleysan**, sidaa daraadeed ilmaha/ardayga waa inuu si waayoaragnimo iyo biseyl ku jirto uga qayb qaataa waxbarashadiisa uuna si wanaagsa u qaadaa mas'uuliyada casharadiisa.
- Waxaan rabnaa inaan ilmaha/ardayda siino **badbaado** sidaa daraadeed mar walba waxaa la jooga qof weyn si gacan looga geysto **kulan bulshonimo oo wanaagsan** oo dhexdeena ah, xitaa wadhadalka, taageerada iyo caawimaada xiriirka saaxiibtinimada.
- Waxaan rabnaa inaan ilmaha/ardayda siino **isku kalsoonaan wanaagsan**, sidaa daraadeed ilmaha/ardayda waxaan ku qaabileynaa inta karaankiisa gaarsiisanyahay.
- Waxaan rabnaa inaan **adkeyno cayaar wadaaga** dhexdeena ah, halkaasoo ilmaha/ardayda iyo macalimiinta si dhab ah oo muhiimsan u qaadanaayaan. Sidaa daraadeed waxaan ku dadaaleynaa inaan wax walba hadal ku dhameyno taas macnaheedu waa inaan si furan u wada hadli karno isuna maqli karno.
- Waxaan boos siineynaa **xiriir saaxiibtinimo** oo wanaagsan, sidaa daraadeed ilmaha/ardayda waxaan siineynaa qalab muhiim ah si ay si wanaagsan oo qadarin iyo qiimeyn leh ay u wada kulmaan..